# Hagida ku saabsan sida loo gudbisto dacwad

Xeerka xuquuqul insaanka (*xeerka*) waa sharci hoose kaasoo qowalba oo aaminsan in la takooey uu u gudbinkaro dacwadiisa isaga la xidhiidhayo Komishinka xuquuqul insaanka ee Manitoba ("komishinka"). Xeerku waxa uu sheegayaa in loo shaqeeyaaha, adeeg bixiyeyaasha iyo mulkiiliyaasha waa inaysan qofna takoorin iyada oo aan wax sabab macquul ahi loo heysanin in sidaas la sameeyo.

## Ma takoor baa waxa igu dhacey?

Takoorku waxa weeye in qof shaqsi ahi loola dhaqmo si ka duwan taasoo ay wax aan u fiicneyn iyaga u tahay sabab la xidhiidha in xeerku uu ilaaliyey astaamaha qofka sida dhinacyada aqoonsiga qofka shakhsiga ah oo abtirsiinyada ama isirka; dal dhalashada; diinta ama caqiidada; asalka qowmiyadeed; da'da; jinsiga (ay ku jirto mida uurka leh); aqoonsiga jinsiyadeed; jinsiga uu qofku lid ku yahay; xaaladda guurka ama qoyska; isha dakhliga; aaminsanaantiisa ku aadan dhinaca siyaasada; baahiyaha gaarka ah dhinaca jidhka ama maskaxda; taageero la'aanta dhinaca bulshada; iyo diiwaanka dembiyada.

Sidoo kale takooridu waxa weeye in lagu guul dareysto in si caqli gal ahi loo habeeyo baahiyaha gaarka ah ee uu qofka shaqsiga ahi qabo kaasoo lagu saleynayo midkamid ah astaamaha ku dhex diiwaangashan xeerka.
Komishinku waxaa laga yaabaa inuu aqbalo dacwadaha ku salleysan in qeyb laga yahay koox kale oo taariikhiyan ah kuwo aad loo takooro/ama faqri ah, waa marka wada hadal dheer ah lala yeesho sarkaalka xog uruuriyaha.

## Ma dhibaateeyn baa wixii igu dhacey?

Dhibaateyntu waa nooc kamid ah takoorka. Dhibaateyntu waa dhaqan qaldan.xun kaasoo la xidhiidha midkamid ah astaamaha ku yaal xeerka sidoo kalena isugu jira ama uu kamidka yahay dhibaateynta dhinaca isku tegga.

## Ma aarsi baa wixii igu dhacey?

Aarsigu waa aargoosi ka dhan ah qofka dacwada gudbinayo, ka qeybqaadanayo in the lagu dhexjiro geedi socodka dacwada ama diidayo inuu ka soo horjeedsado *sharciga.*

## Qofwalba miyuu gudbi san karaa dacwad? Ma waxaa jira waqti xaddidan?

Cabashada waxaa gudbisan kara qofkasta iyadoo in cid kale ay carqaladeysay xeerkii la isku eedeeynayo.
Dacwaduhu waxaa waajib ah lagu diiwaangeliyo hal sano gudaheea falka dhinaca takoorka ee lagusoo eedeeyay. Kiisaska qaarkood, waxaa lasii dheereeyn karaa waqtigan xaddidan.

## Sideen u gudbistaa dacwad?

Hadii aad aaminsantahay in lagu takooray, fadlan waxaad la xidhiidhaa komishinka iyo sidoo kale sarkaalka xog uruuriyaha oo isaga ayaa ku caawin doono. Adeegyadeena iyo daabacyadeena waxaa lagu heli karaa luuqadaha ingiriiska iyo faransiiska sidoo kalena dadka qaba baahiyaha gaarka ah weey heli karaan. Waxeeynu sidoo kale marka la codsado diyaarin karnaa qof tarjumaa ah. Ma jirto runtii wax khidmad ah oo la iska qaadayo marka la gudbnisanayo dacwad ku saabsan xuquuqul insaanka ama la raadinayo talo ku saabsan walaacyo ku aadan dhinaca xuquuqul insaanka.

Shaqaalaha komishinku waa dad ka fog eexashada oo sidoo kale uma doodaan ama ma dhinac istaagaan labada koox isheyso midkoodna.

## Waa maxey xogta la iga doonayo in aan bixiyo?

Kiiskaagu hadii uu ku dhaco xeerka, sarkaal ayaa ku su'aali doona inaad buuxiso foom uu ku qoranyahay sahan la buuxbuuxinayo. Foomkani wuxuu inaga caawin doonaa inaynu diyaarino qoraal qabyodeed ku saabsan cabashadaada. Xogta aad na siiso iyo foomka waxeeynu u isticmaali doonaa in lagu aqoonsado ururka ama shaqsiga (''eedeeysanaha'') kasoo aad adigu (''dacweeyaha'') ka dacwooneyso. Shaqaale ayaa sidoo kale soo aruurin doona xog ku aadan eedeymahaaga dhinaca takoorka, sida tusaale ahaan waxa dhacay iyo sidoo kale waxa aad aaminsantahay inuu sababay hab-macaamilkaasi takoor. Waxaa laga yaabaa in lagu su'aalo markhaatiyeyaal macquul ah iyo xog kale oo khuseyso dacwadaada, sida tusaale ahaan diiwaan ku saabsan shaqaada sida waraaqaha jeeygaga, caafimaadka, kirada ama diiwaanka qofka shaqaalaha ee ku saabsan shaqada. Iyadoo ay ku xidhantahay cabashadaada, waxaa laga yaabaa in lagu su'aalo inaad saxiixdo foomka caafimaadka ama foomam kale ee ogolaanshiyaha si aynu inagu u helno xog laga maarmaan u ah baadhista cabashadaada.

Saraakiisha wax baadhta ayaa laga yaabaa inay ku weeydiiyaan dikumiintiyo kale kuwaasoo waxtar uleh baadhista ku aadan cabashadaada. Faylkaaga ayeey ku keydin doonaan xogtani. Hadii cabashadaada la baadhey, baadhaha ayaa ku weeydiin doona dikumiintiyo ama cadeeymo kale oo laga yaabo inay u baahnaan doonaan si ay ugu

baadhaan cabashadaada. Hadii aad heyso dikumiintiyo ama qalab/agab kale oo aad aaminsantahay inay waxtar uleeyihiin cabashadaada/dacwadaada, waxaa waajib ah inaad goob amaan leh ku keydiso sidaasi darteed waxaa la siin doonaa hadhow kiis baadhe.

## Waa ayo cida aan ka dacwoonayo?

Saraakiisheena wax baadha ayaa kaa caawin doona inaad go'aansato cida ay tahay inaad ka dacwooto iyagoo dib ugeeis ku sameynaya dikumiintiyada (sida tusaale ahaan T4 ama diiwaanka shaqada shaqaalaha) iyo inay cilmi baadhis ku sameyaan magaca sharciga ah ee ururka. Maadaame xeerku uu quseeyo qofka loo shaqeeyo ficiladiisa, adeeg bixiyeyaasha, guriyo bixiyeyaasha, dacwado waxeey u badantahay inay noqoto mid ka dhan shirkad ama urur. Kiisaska qaarkood, dacwadu waxaa laga gudbin karaa shaqsi gaar ah (sida tusaale ahaan marka mulkiile ganacsi uu dhibaateeyo qof shaqsi ah ama hadii guri bixiyuhu uu yahay shaqsi).

## Miyuu komishinku awoodaa inuu aniga isiiyo talo?

Saraakiisheena wax baadha ma awoodaan inay bixiyaan talo sharci. Waxeey awoodaan inay bixiyaan xog ku saabsan xeerka; shuruucdiisa iyo waxa uu daboolo. Waxeey sidoo kale iyagu sameyn karaan soo jeedin ku salleysan khibradooda. Waxaad xaq uleedahay inaad garyaqaan u tegto, laakiin aad muhiim uma ahan. Shaqaalaha komishinka waa kuwo ka fog eexda sidoo kalena uma doodaan midkood labada qof isheysta.

## Muxuu komishinku ka qabta dacwadeyda?

Saraakiisheena baadhista ayaa qaadi doona xogta aad bixiso iyagoo ku qaadi doona foomka sahanka sidoo kalena ku diyaarin foomkeena caadiga ah ee dacwada. Dacwadu waa inay si waadix ah u muujineysaa waxyaabaha aasaaska u ah dacwadaada sidoo kalena waxeey noqotaa keliya 1 ama 2 bogag.
Dacwadu waa in lasoo diiwaangeliyo kahor inta aan la siin ama la tusin eedeeysanaha si uu uga jawaabo. Komishinka ayaa kadib go'aansan doona hadii ay awoodi karaan inay baadhaan dacwada. Kiisaska qaarkood, waxaa dhacda in dacwaduhu la burburiyo iyadoo aan wax baadhis ah la sameynin waa laakiin hadii loo maray geedi socodkale oo sharci ah, ama hadii ficilada laga dacwoonayo aysan ku jirin xeerka. Fadlan eeg qeybteena ku saabsan *ku hagida qiimeyn hore iyo sidoo kale in la iskaba buriyo kiiska iyadoon aan wax baadhis ah la sameynin* – hadii aad u baahantahay xog dheeraad ah oo ku saabsan geedi socodkan.

Kiisaska uu komishinku baadhayo dacwadu, agaasimaha fullinta ee komishinka ayaa dib u eegis ku sameyn doonaa wixii ka soo baxa baadhista. Hadii agaasimaha fullinta uu go'aansado inay jirto cadeyn ku fillan oo takoor ahi, in garsooraha uu gaaro go'aankii

ugu dambeeyay ee ku aadan dhageysiga dadweynaha ee dacwada. Hadii madaxa fullinta uu go'aansado in eedaha ku aadan dacwada aysan dabooleyn xeerka, kuwaasoo lagu xalliyey sharci kale ama aan la helin taageero ku filan oo cadeymo ku saabsan takoorka ah, waxeey markaa burin doonaan dacwada. Xog dheeraad ah oo ku saabsan arimaha geedi socodka baadhista, fadlan eeg hagideena ku aadan baadhista. Xog dheeraad ah oo ku saabsan dhageysiga dadweynaha, eeg *hegideena ku aadan xukunka.*

Komishinku sidoo kale waxa uu soo jeedin doonaa dhexdhexaadin inta lagu guda jiro geedi socodka. Wixii xog dheeraad ah ee ku salleysan habka dhexdhexaadinta, waxaad eegtaa *hagideena ku aadan dhexdhexaadinta.*

## Miyaan heli karaa wax caawimaad ah anigoon gudbin dacwad rasmi ah?

Iyadoo lagu salleynayo muuqaalka arintaada, shaqaalaha komishinka ayaa waxa alaga yaabaa inuu kaa caawiyo xalinta walaacaaga isagoo u marayo dhexdhexaadinta kahor dacwada. Iyadoo ku xidhantahay ogolaanshiyahaaga, sqofka ka socda haqalaha komishinka ayaa tilfoonka ka garaaci doona qofka ama ururka aad aaminsantahay inay yihiin dadka ku takooray, sidoo kalena waxa uu isku dayi doonaa suurtagalnimada ah in xal lagu gaaro si aan rasmi ahaym, iyadoo aysan jirin dacwad qoraal ah. Dhexdhexaadinta dacwada kahor waa mid mutadacnimo, sidoo kalena waxeey u baahantahay ka qeybgalkaaga iyo eedeeysane suurto gal ah. Dacwada kahor wadahalka xal u helida arinta ayaa marwalba ah mid xafidan oo lama shaaciyo hadii kiisku u gudbo dhinaca iyo dacwad rasmi ah.

Qeybo/xisbiyo badan ayaa ka hela geedi socodkan xal lagu qanci karo ama sharaxaad maadaame uu yahay mid degdeg badan sidoo kalena hab aan rasmi aheyn uu yahay. Wada xaajood kasta aad la gaadho eedeeysane caqli gal ah ayaa waxaa waxaa dhacdo in warqad loo diro labadiinuba, si looga fogaado isfahamdaro.

Badanaaba, faylkaaga lagu buuxbuuxiyey xogta lama xidhi doono ilaa iyo inta laga fulinayo qodobbada heshiiska ka dib. Hadii eedeeysanaha suurtagalka ah uu ku guuldareysto inuu dhameystiro heshiiska, waad nala soo xiriiri kartaa waxaynu markale dib u eegi doonaa arinka.

## Waxaan xilli hore dabagal ku sameeyay walaacyadeyda anigoo la socda kooxdayada/ururkeyga ama waxaan u marey geedi socod kale oo sharci ah. Miyaa sidoo kale awoodaa in aan dacwad ku aadan xaquuqul insaanka xareeysan karaa?

Hadii aadba hore u samaysay dabagal ku saabsan arinkaaga adigoo la socda ururkaaga ama aad u martey madal kale oo sharci ah (sida tusaale ahaan gudiga

adeegyada bulshada dhinaca racfaanka, gudiga magdhowga shaqaalaha, ama loo marey maxkamadaha), waxaa laga yaabaa in komishinka looga baahdo inay gebi ahaanba joojiyaan dacwadaada iyada oo aan la sameyn wax baadhis ah. Taasi waxeey hubineysaa in arrimo isku mid ahi aan lagu sameynin dabagal iyadoo la marayo madal sharciyeed oo farabadan sidoo kalena komishinku uu ixtiraamo awoodaha go’aan qaatayaasha sharci ee kale. Wixii macluumaad dheeri ah, fadlan eeg *hagida qiimeynta hore iyo joojinta baadhis la’aan.*

Hadii aad dabagal ku sameysay arinkaaga adigoo u marey madal kale, fadlan ku wargeli sarkaalkaaga dhinaca xog uruurinta. Waxeey kuu sii gudbinayaan caawimo kale ama heyado kale, halka ay arintaadu khuseyso.

This guide is available in alternate formats.
*Ce guide est disponible en français*.